




Home Link - Somali



Home Links Xiriirinta Guriga Cutubka 5aad: Hoosaska iyo Humaagyada: Isbuuca 3aad

Qoysaska Qaaliga ah: Cutubkani wuxuu cunuggaagu baran doonaa hoosaska iyo humaagyada. Isku day ugu yaraan saddex kamid ah hawlaha waxbarasho ee xiisaha leh, ama dhamaantood samee! Waxa ugu muhiimsan waa inaad ku raaxaysato wakhtiga yar ee uu cunugaagu wax ku baranayo waxa ka dhacaya fasalka. Fadlan midabee sanduuqyada hawlaha aad doorato, kuna soo celi foomkan dugsiga Isniinta soo socota. **XARAABEYSO!**

Magaca Ilmaha: _____

<p style="text-align: center;"><u>Qorista</u></p> <p>Gabay: Kani waa gabay ilmahaagu yaqaano.</p> <p style="text-align: center;">My Big Balloon</p> <p>I can make a big balloon. Watch me while I blow. Small at first, then bigger, Watch it grow and grow. Do you think it's big enough? Maybe I should stop. For if I blow much longer, My balloon will surely pop!</p>	<p style="text-align: center;"><u>Luugadda</u></p> <p>Sawireynta and Sheekaynta: (La xiriirta <i>Dreams</i>)</p> <p>Weydii cunugaaga inuu kuu sawiro oo kuu sheego riyo uu ku riyooday. Ku qoro ereyadiisa / erayadeeda warqad, hadday suurtoagal tahay, si wadajir ah u wada jila.</p> <p>Bilowga Wadahadalka:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Li sheeg waxa ku saabsan riyadaada. ● Sidee ayaa riyadaadu ku dareensiisay? <p>Ereyada Loo Isticmaalo inta Lagu Jiro Wadahadalka: <i>riyo, malayn, hurdo, sheeko</i></p>
<p style="text-align: center;"><u>Hadal iyo Akhris Wadajir Ah</u> (20 daqiiqadood)</p> <p>Lagu bilaawayaasha Wadahadalka:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Maxaad u maleynaysaa in buuggani ku saabsanaan doono? ● Waa maxay qeybta aad ugu jeceshahay sheekada? ● Waa maxay waxa ugu horreeya ee ku dhaca sheekada? ● Maxaad u maleyneysaa inay dhici doonto marka xiga? ● Shakhsiyaadka sheekada kee baad u jeceshahay? 	<p style="text-align: center;"><u>Daahfur</u></p> <p>Hoos Ugaarsi: (La xiriirta <i>Dreams</i> iyo <i>Kitten's First Full Moon</i>)</p> <p>U sheeg cunuggaaga inaad ku socotid ugaadhsi humaag (ha ahaato banaanka ama gudaha gurigaaga). Markaad aragto humaagyo, Ku qaado sawirro taleefankaaga.</p> <p>Bilowga Wadahadalka:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Maxaa abuuray humaagadan? ● Halkee ayaan ka helnay humaagyada ugu badan? <p>Ereyada loo Isticmaalo inta Lagu Jiro Wadahadalka: <i>ka mid ah hoosaska, iftiinka, ka weyn, ka yar, ka dheer, ilaha</i></p>

Xisaab

Waxaan ku Tiftifaa Qqaabab:

Kula kaltan cunugaaga raadinta walxo (waxyaabo) qaabab kala duwan. Waxaad dhahdaa, "Waxaan ku tiftifaa indhahayga wax yar oo..."

Xusuuso:

- Saddexagal waxuu leeyahay 3 dhinac oo toosan, oo isku xiran iyo 3 xaglood ama gees.
- Laydi wuxuu leeyahay 4 dhinac oo isku xiran, dhinacyada iska soo horjeeda waa simanyihiin wuxuuna leeyahay 4 xaglood ama gees.
- Laba jibbaarane waa nooc gaar ah oo leydi ah oo leh 4 dhinac oo isku xidhan oo dhererkoodu isle'eg yahay iyo 4 xagal ama gees.
- Goobo waa xariiq joogto ah oo duuban.

Bilowga Wadahadalka:

- Sidee ku ogtahaya inuu ahaa _____?
- Waa maxay farqiga u dhexeeya laba jibbaarane iyo leydi Maxaa ka dhigaya isku mid?

Diiwaanka Akhrinta

Calaamadee maalin kasta adiga iyo cunugaaga aad sheeko wada akhrisaan. Buugaagtu waxay noqon karaan Af Ingiriis ama luuqada gurigaaga. Booqo Maktabadda Dadweynaha Boston saad u hesho buugaag wanaagsan oo ku saabsan hoosaska iyo humaagyada.

Isniin _____ Talaado _____ Arbaco _____ Khamiis _____ Jimco _____ Sabti _____ Axad _____

Buugaqa aan ku akhrino dugsiga:

Dreams
oo u qoray Ezra Jack Keats

Buugaag kale adiga iyo ilmahaaga laga yaabo in aadjeclaataan:

Shadows and Reflections oo ay qoray Tana Hobin
The Night World oo uu qoray Mordicai Gerstein

Tallooyinka si Wadajir ah u Akhrinta:

- Wada fadhiista meel xasilloon oo degan.
- Marka aad akhrinayso, iftiimi oo qeex erayada cusub. Tusaale ahaan, "**Humaaggu** waa mugdi (madow) shay qariyey iftiinka."
- Marka aad akhrinayso, weydii ilmahaaga su'aalaha ku saabsan buugga. Tusaale ahaan, "Maxaad ugu maleynaysaa in uu hooska jiirku (dooligu) uu usii weynaadey markuu soo dhacayey?"